

Madaxwaynaha Maraykanka iyo Vermonter Calvin Coolidge ayaa ka hadlay **"gobolka yar ee geesiga ah ee Vermont"** kadib daad ba'an ku dhawaad 100 sano kahor. Dareenkan geesinimada iyo adkaysiga ah ee dadka reer Vermont waxa uu sii ahaan doonaa run maadaama aynu si wada jir ah uga gudbayno safmarka coronavirus. Carruurta iyo Shaqaalaha Baahida Caafimaad ee Gaarka ah leh waxay fahansan yihiin safmarka coronavirus inuu caqabad gaar ah ku yahay waalidka iyo daryeelayaasha kuwaas oo markaa si kadis ah isu ogaaday iyaga oo ah kalkaaliyeyaal caafimaad, shaqaalaha daryeelka shakhsi ahaaneed, ama macalimiinta waxbarashada gaarka ah oo wakhti buuxa shaqaynaya. **Kooxdeenu waxay sii wadi doontaa xidhiidhka:** wax aanu filanaynaa in aanu soo dirno qodobada ugu muhiimsan macluumaadkan todobaad kasta. Maadaama oo diiradii aanu saaraynay shaqadayadu ay u weecatay ugu horrayn jawaab-celinta safmarka, waxa aanu doonaynaa in aad ogaato **in aanu halkan adiga kuu joogno**, lana heli karos, oo aynu si wada jir ah wakhtigan uga wada gudbi doono.

Nala Hadal

- Shaqaalaha ku sugan [CSHN](#) waxaa ka go'an inay kula socodsiiyaan khayraadka iyo macluumaadka ugu danbeeya ee adeegyada khusayn kara qoyskaaga. In kasta oo booqashada shakhsi ahaaneed wakhti xaadirkan la hakiyay, waxa kaliya ina kala xigaa waa taleefan ama email.
- Waxa aad qabataa websaytkayaga si aad u hesho [CSHN Care Coordinator](#) maxalliga ah ama nagala soo hadal 802-863-7338.

Qodobada Muhiimka ah

- [Children's Personal Care Services](#): Hay'ada Vermont ee Adeegyada Aadanaha waxay usoo gudbiyeen dalabka tanaasulida federalka Xarumaha Adeegyada Medicare iyo Medicaid (Centers for Medicare and Medicaid Services, CMS) taas oo waalidka u iyo daryeelayaasha koowaad u ogolaanaysa in lacag lagu siiyo taageerada daryeelka shakhsi ahaneed ee dheeraadka ah taas oo ay siinayaan caruurtooda u qalanta inta lagu jiro xaalada degdega ah ee caafimaad ee shacabka. 2 dii Abriil, 2020, CMS waxa ay bixisay ogolaansho ku meel gaadh ah si loogu dhaqan geliyo isbadalkan qaab kumeel gaadh oo kaliya. Shaqaalaha Adeegyada Daryeelka Shakhsi Ahaaneed ee Caruurta, Vermont Medicaid iyo ARIS Solutions waxay hadda kala saarayaan faahfaahinta sida loo socodsiiyo siinta lacagta waalidka iyo daryeel bixiyayaasha koowaad. Lacagagan waxa ay ku salaysan yihiin daryeelka shakhsi ahaneed ee caafimaad ahaan daruuriga ah ee caruurtaada u qalantaa ay u baahan yihiin. Waxa aanu damacsanahay in aanu macluumaad dheeraad ah oo gaar ah baahino inta la joogo Hoolka Magaalada Jimcaha, 10^{ka} Abriil oo ay soo qaban qaabiyeen [Vermont Family Network](#).

Khayraadka

- [COVID-19: Information for Families of Children and Youth with Special Health Care Needs](#) – waxaa laga heley Machadka Maraykanka ee Caafimaadka Caruurta. Diiwaanka iyo maqaalka ay la socdaan talooyinka waxa uu qoysasku qaban karaan si ay amaankooda iyo caafimaadkooda u ilaaliyaan, oo uu isku keeney dhakhtarka caruurta qof matalaya Codadka Qoyska. Waxaa uu ku darayaa talada diyaarinta guriga, balamaha caafimaadka, agabka, dugsiga, la qabsashada, iyo khayraadka.

Nuqulka 1, Abriil

- [COVID-19 - Retail Pharmacy Home Delivery Options](#): Liiska ikhtiyaarka farmasiiyada tafaariiqdakeenista guriga - Farmasiiyada Ka Diiwaangashan Medicaid Inta Lagu Jiro Xaalada Degdega ah ee COVID-19
- Hel macluumaadku saabsan cusboonaysiintayada www.healthvermont.gov/family/special-health-needs.